

## Macluumaad iyo su'aalo ka hor doorashada dugsiiga ee sannad dugsiyeedka 2015/2016

Degmada Växjö, maamulka xafiiska daryeelka carruurta iyo dugsiiga waxay ku dhex jiraan dib u habeyn ballaadhan oo lagu eegayo baahiyaha kala duwan ee dugsiyada iyo xannaanooyinka cusub ee magaalada Växjö, maadaama oo ay magaalada Växjö sii weynaanayso. Carruurta da'doodu u dhaxayso 1-12 sano ayaa shantii sanno ee la soo dhaafay sii batay, iyada oo la saadaalinayo in ay sii kordhi doonaan. Saadaashii hore ee qorshahayagu ku salaysnaa sannadadii ugu dambeeyay waxay noqotay mid aan saxsanayn, iyada oo ilaa 100 arday sannadkiiba ka sarraysa qorshahayagii. Sidaas darteed baahidii dugsiyadu way ka soo degdegtay wakhtigii aanu ku saadaalminaynay.

Waxaa hadda badhtamaha magaalada Växjö ku yaalla tiro dugsi oo dhowr ah; Bäckaslövsskolan, Ulriksbergsskolan, Centrumskolan iyo Ringsbergsskolan, kuwaas oo horeba ugu dhowaa in ay buuxsamaan. Waxa aannu u baahannahay in dhawaan dugsi kale la furo si loo daboolo baahidan. Intaa waxaa dheer, waxaan helnay warbixinno badan oo cabashooyin waalid ah oo ku saabsan fogaanshaha dugsiyada Fagrabäcksskolan iyo Teleborg Centrum oo ah dugsiyada loo diro ardayda dugsiyada dhexe. Waxay dadku rabaan in dugsi dhexe oo cusub laga furo meel u dhow dugsiyadan hoose.

Maamulkayaga ayaa sidaas awgeed waxay nasiib u heleen in ay dugsi cusub ka sameeyaan dhismaha ku yaalla Storgatan 50-52. Dhismahan waxa laga dhigi doonaa mid ku habboon dugsi dhexe oo ah fasallada 4aad ilaa 9aad. Sidan waxa loo samaynayaa iyada oo la eegayo sannad dugsiyeeddada baahida weyn loo qabo. Dhismayaasha Storgatan 50-52 ku yaalla waxa dib u dhis lagu samaynayaa sannadada soo socda, waxana la rajaynayaa in la furo sannadka 2017 gudihiisa.

Waxa waalidiinta qaar ka mid ahi naga codsadeen in aannu eegno haddii la bilaabi karo sannad dugsiyeedka soo socda dhowr fasal oo 7aad oo cusub, si loo daboolo baahida. Waxa laga yaabaa inay suurtoagal tahay in dugsiigan cusub qayb waxbarasho oo kooban laga bilaabo dayrta sannadka 2015.

Waxa aan warqaddan u soo qornay si aan mas'uulka/waalidiinta u weydiinno su'aalo aannu ku eegayno xiisaha loo hayo in dhismaha Storgatan 50-52 laga bilaabo fasalka 7aad sannadka soo socda ee dayrta 2015 (sannad dugsiyeedka soo socda). Foomkani ma aha mid aad ku dooranaysid dugsi qasab ah ama mid aad isku qoreysid dugsi. Baadhitaankan ujeedadiisu waa in maamulka xafiiska daryeelka carruurta iyo dugsiiga ay helaan sawir buuxa oo tilmaamaya xiisaha, si loo helo qorshe suuban iyo go'aammada siyaasadeed.

Haddii ay dad badani danaynayaan waxaan awoodi karnaa in aan furno fasallada 7aad dayrta sannadka 2015. Dabcan dadka raba in ay joogaan dugsiyada loo diray ee Teleborg Centrum och Fagrabäcksskolan waa loo tixgelinayaa dalabkooda. Waxa intaa dheer in ay suurtoagal tahay in la sameeyo doorasho dugsi oo kala duwan iyada oo la raacayo qaabka caadiga ah ee dalabka dugsiyada. Doorashadan dugsiiga waxa ay dhici doontaa bisha Februari bilawgeeda, waxana aad heli doontaan warqado warbixineed oo ku saabsan sida loo doorto dugsi kuwa bilaabaya fasalka 7aad.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Storgatan 50-52 waxaad heli doontaan xilliga doorashada dugsi ee nagu soo wajahan.

Waxa aad la xidhiidhi kartaa madaxa qaybta Erling Rask haddii aad wax su'aalo ah haysaan, telefoonkiisu waa 0470-419 97 ama [erling.rask@vaxjo.se](mailto:erling.rask@vaxjo.se)

Anders Elingfors  
Maareeyaha Hawlgalka